Casharka 31

1. Kaddib markii Ilaah ka waday dhulka Masar, halkee buu Ilaah geeyey reer binu Israa'iil?
-Waxaa lagu celinayaa dhulkii Kancaan.

2. Sidee baa Ilaah u hoggaaminayey reer binu Israa'iil wakhtiga maalinnimada?
-Wuxuu ku hoggaaminayey daruur.

3. Sidee baa Ilaah ku hoggaaminayey reer binu Israa'iil wakhtiga habeennimada?
-Wuxuu ku hoggaaminayey daruur sida tiir oo kale ah oo weliba sida dabka u dhalaalaysa.
-Daruur sida tiir oo kale ah oo dab ah.

4. Maxaa Ilaah reer binu Israa'iil ugu hoggaamiyey agagaarka Badda Cas?
-Ilaah wuxuu doonayey inuu Maaarida iyo reer binu Israa'iilba tuso in isaga oo keliya uu Ilaah yahay.

5. Maxay reer binu Israa'iil sameeyeen markii ay arkeen Fircoon iyo kciidankiisii oo ku dhow inay soo qabtaan?
-Reer binu Israa'iil waxay eedeeyeen Muuse, oo waxay ku yiraahdeen waxaannu joogaynaa dhulkii Masar.

6. Miyaa reer binu Israa'iil awood u lahaayeen inay is-badbaadiyaan?
-Maya.

7. Maxaanay reer binu Israa'iil u awoodin inay is-badbaadi-yaan?
-Waayo Badda Cas way ka horraysay, buuruhuna geesaha ayey ka



xigeen, oo ciidamadii fircoonna way ka dambeeyeen.

8. Waa kuma kan keliya ee badbaadin karay reer binu Israa'iil?
-Ilaah.

9. Waa maxay sababta aanay Ilaah ugu adkayn inuu furo Badda Cas?
-Waayo Ilaah baa Badda Cas abuuray.
-Waayo Ilaah waa Sayidka Badaha oo dhan.
-Waayo Ilaah waa qaadir, oo wax walibana awooddiisuu ku hayaa.

10. Maaddaama Fircoon iyo ciidammadiisa ay ku soo dhowaayeen inay mar kale qabsadaan reer binu Israa'iil, haddaba maxaa Ilaah sameeyey si uu ku daafaco Israa'iil?
-Ilaah daruurtii ayaa kala dhex geliyey Israa'iil iyo Fircoon iyo ciidammadiisii.
-Daruurtii waxay iftiiminaysay reer binu Israa'iil, ha yeeshee Fircoon iyo ciidammadiisu waxba ma arkaynin.

11. Maxaa Ilaah sameeyey kaddib markii Fircoon iyo ciidammadiisii ay ka soo daba bexeen ilaa iyo Badda Cas?
-Ilaah baa Fircoon iyo masriyiintiiba ku qarqiyey Badda Cas dhexdeeda.

12. Waa maxay sababta Ilaah u daafacayey reer binu Israa'iil?
-Waayo Ilaah wuxuu ballanqaaday inuu Badbaadiy aha ka soo dhex bixin doono Ibraahim iyo Israa'iil.
-Waayo Ilaah wuxuu kaloo doonayey inuu Eraygiisa soo diro, waa Baybalka e, isagoo soo dhex marsiinaya Ibraahim iyo Israa'iil.
-Kaddib markii Ilaah ku dhex burburiyey Fircoon iyo ciidammadiisii Badda Cas, halkee buu Ilaah ku hoggaamiyey reer binu Israa'iil?

-Wuxuu ku hoggaamiyey lama degaanka.
-Waa maxay lama degaan?

-Lama degaanku waa dhul halkaasoo aan ciid bacad ahi ay ku badan tahay.

-Welibana lama-degaanku geedo ma leh.
-Lama-degaanku caws ma leh.
-Lama degaanku ma leh ciid qaali ah.

-Waxaa lama-degaanka daadsan bacadka.

-Marka Ilaah ku dhex hoggaaminayey reer binu Israa'iil lama-degaanka, maxay reer binu Isra'aiil sameeyeen?

Bal aynu akhrinno Baxniintii 16:1-3

1-Markaasay ka ambabexeen Eeliim, oo shiriii reer binu Israa'iil oo dhammu waxay yimaadeen cidlada Siin la yidhaahdo, taasoo u dhaxaysa Eeliim iyo Siinay, waxayna ahayd bishii labaad, maalinteedii shan iyo tobnaad, taasoo ka dambaysay baxniintii ay Masar ka soo bexeen.
2-Markaasaa shirkii reer binu Israa'iil oo dhammu cidladii Muus iyo Haaruun ugu guuseen.
3-Oo reer binu Israa'iilna waxay iyagii ku yidhaahdeen, Waxaa noo wanaagsanaan lahayd inaannu gacanta Rabbiga ku dhimanno, annagoo dalkii Masar joogna, intii aannu ag fadhinnay dheryaha hilibka ah, oo aannu kibis ka dhergaynay, waayo, waxaad cidladan noogu soo bixiseen inaad ururkan oo dhan gaajo ku dishaan.

-Reer binu Israa'iil waxay eedeeyeen Muuse iyo Haaruun.



-Waa maxay sababta reer binu Israa'iil ay u eedaynayaan Muuse iyo Haaruun?

-Waxay u eedeeyeen waxay ahayd cunto la'aan soo food-saartay aawadeed.

-Maxaa sabab u ahaa in reer binu Israa'iil ay cunno waayaan?

-Waayo waxay joogeen markaas iyada ah lama-degaanka.
-Lama-degaanka waxaa laga helaa oo ku badan bacadka.

-Miyaa Muuse awooday inuu reer binu Israa'iil cunno ugu keeno ama ku siiyo lama-degaanka?
-Maya.

-Maxaa sabab u ah taas?
-Waayo cunno ma lahan lama-degaanka.

-Miyaa reer binu Israa'iil awood u lahaayeen inay cunno ka dhex raadsadaan lama-degaank?
-Maya.

-Maxaa sabab u ah?
-Waayo lama-degaanka cunno lagama helo.

-Waa kuma kan keliya ee awoodda u lahaa inuu reer binu Israa'iil cunno ka dhex siiyo lama-degaanka?
-Ilaah.

-Miyaa reer binu Israa'iil rumaysteen in Ilaah cunno ka dhex siin karo lama degaanka?
-Maya.

-Haddaba intii ay rumaysan lhaayeen in Ilaah ku dhex quudin karo lama-degaanka, maxay yeeleen reer binu Israa'iil?

-Waxay eedeeyeen Muuse iyo Haaruun.

-Miyaa Ilaah maqlay reer binu Israa'iil oo eedaynaya Muuse iyo Haaruun?
-Haa.

-Maxaa haddaba Ilaah ku yiri Muuse?

Bal aynu akhrinno Baxniintii 16:11-12

11-Markaasaa Rabbigu Muuse la hadlay, oo wuxuu isagii ku yidhi.
12-Anigu waan maqlay gunuuskii reer binu Israa'iil; haddaba hadal, oo waxaad ku tidhaadaa, Makhribka waxaad cuni doontaan hilib, subaxdana waxaad ka dhergi doontaan kibis; oo waad ogaan doontaan inaan anigu ahay Rabbiga Ilaahiinna ah.

-Ilaah wuxuu Muuse u sheegay in uu reer binu Israa'iil siin doono cunno.

-Weliba reer binu Israa'iil Ilaah ma ayan rumaynin, Ilaahna wuxuu yiri, cunno ayaan siin doonaa iyaga.

-Ilaah wuxuu caawinayey reer binu Israa'iil inkastoo ayan rumaynin Isaga.

-Maxaa haddaba Ilaah u caawiyaa dadka iyagoo weliba aan isaga rumaysnayn?



-Waayo Ilaah baa dadka oo dhan abuuray.
-Waayo Ilaah wuu jecel yahay dadka ood han.

-Waayo Ilaah wuxuu doonayaa inuu badbaadiyo dadka ood han.
-Waayo Ilaah wuxuu doonayaa in dadka oodhan ay isaga rumaystaan.

-Haddii aynaan Ilaah ku kalsoonaan, miyaa Ilaah ina badbaadinayaa?
-Maya.

-Miyaa Ilaah raalli ka noqonayaa inay reer binu Israa'iil gaajo u dhintaan?
-Miyaase Ilaah reer binu Israa'iil siinayaa cunno?

Bal aynu akhrinno Baxniintii 16:13a

13-Oo waxaa dhacday in makhribkii digaagduur yimaadeen oo ay xeradii oo dhan qariyeen.

-Muxuu ahaa hilibkii Ilaah iyaga ugu keenay lama-degaanka habeenkaas?

-Digaagduur.

-Waxaa jiray digaagduur qariyey xerada reer binu Israa'iil.

-Maalintii xigtay, Ilaah wuxuu reer binu Israa'iil siiyey cunno aad iyo aad u badan.

Bal aynu akhrinno Baxniintii 16:13b-15 & 31

13-Oo subaxdiina waxaa degmadii hareeraheeda ku soo degay sayax barafoobay.

14-Oo markii sayaxii soo degay baaba'ay ayaa waxaa dhulkii cidlada ku hadhay wax yaryar oo goobaaban oo laala'eg sayax barafoobay.

15-Oo markay reer binu Israa'iil arkeen ayaa midkoodba ka kale ku yidhi, Maxay tahay? Waayo, ma ay garanayn waxay tahay. Kolkaasaa Muuse wuxuu iyagii ku yidhi, Tanu waa kibistii Rabbigu idiin siiyey inaad cuntaan.

31-Oo reer binu Israa'iil waxay magaceedii u bixiyeen Maanna; oow axay u caddayd sida midhaha koryander la yidhaahdo, waxayna u dhadhan ekayd sidii buskud malab lagu sameeyey.

-Maxay ahayd cunnada Ilaah siiyey reer binu Israa'iil subuxii xigtay?

-Ilaah wuxuu reer binu Israa'iil siiyey kibis.

-Waxaana cunnadu ay tiillay ama la soo dhigay hareeraha xerada.

-Maxaa reer binu Israa'iil ugu yeereen kibistan Ilaah u soo diray ee jannada ka timid?
-Manna.

-Subax waiba, Ilaah wuxuu samada sare sida sayaxa oo kale uga soo daadin jiray kibis si uu u quudiyo reer binu Israa'iil.

-Kibista samada ka timid ee Ilaah siiyey reer binu Israa'iil subax waliba waxay ahayd calaamad muujinaya nimcada Ilaah.

-In kastoo Aadan iyo Xaawo ay Ilaah adeeci waayeen, Ilaah



nimcadiisa awgeed wuxuu ballan-qaaday inuu soo diri doono Badbaadiyaha dadka oo dhan.

-Inkastoo Nuux iyo qoyskiisii ay dembeeleyaal ahaayen, Ilaah nimcadiisa awgeed ayuu iyaga kaga difaacay daadkii.

-Inkastoo reer binu Israa'iil ayan rumaynin Ilaah, haddana Ilaah wuxuu awood u lahaa inuu badbaadiyo, Ilaah nimcdiisa awgeed wuxuu furay Badda Cas si ay uga baxsadaan Fircoon iyo Ciidankiisa.

-Waxyaabahaas oo dhanina waa calaamad sheegaysa nimcada Ilaah.

-Waayo sannaddadii reer binu Israa'iil ay cidlada joogeen, Ilaah wuxuu iyaga subax waliba ku quudinayey Mannada.

Bal aynu akhrinno Baxniintii 16:35

35-Sannadood, ilaa ay yimaadeen dhul la deggan yahay. Waxay cuni jireen mannadii ilaa ayi mimaadeen dalkii reer Kancaan xadkiisii.

-Ilaah hal maalin ma uusan illoobin inuu reer binu Israa'iil siiyo mannada.
-Ilaah mar waliba wuxuu dhowraa Ballammadiisa.

-Inkastoo Ilaah siiyey reer binu Israa'iil digaagduur iyo Manna, weli reer binu Israa'iil dacwad bay qabeen.

Bal aynu akhrinno Baxniintii 17:1-4

1-Oo markaasaa shirkii reer binu Israa'iil ood hammu waxay ka sodcaaleen cidlada Siin la yidhaahdo, oo waxay u sodeen sidii Rabbigu ku amray, kolkaasay waxay degeen meel la yidhaahdo Efiidiim; oo dadkuna ma ay haysan biyo ay cabbaan.
2-Sidaas daraaddeed dadkii waxay la dirireen Muuse, oo waxay ku yidhaahdeen, War biyo aannu cabno na sii. Kolkaasaa Muuse wuxuu iyagii ku yidhi, Bal maxaad aniga iila diriraysaan? Oo maxaad Rabbiga u jirrabaysaan?
3-Markaasay dadkii meeshaas biyo ugu harraadeen; kolkaasaa dadkii intay Muuse u gunuuseen ayay waxay ku yidhaahdeen, War maxaad Masar nooga soo kaxaysay? Ma inaad annaga iyo carruurtayada, iyo xoolahayaga harraad noogu disha baa?
4-Kolkaasaa Muuse Rabbiga u qayshaday oo ku yidhi, Bal maxaan dadkan ku sameeyaa? Waayo, waxay ku dhow yihiin inay i dhagxiyaan.

-Maxaa sabab u ah in reer binu Israa'iil Ilaah u gunuusaan?
-Waayo biyo ma ay haysanin.

-Maxa sabab u ah in reer binu Israa'iil ay waayaan biyo?

-Waayo waxay joogaan lama degaanka.
-Lama-degaanna biyo lagama helo.

-Myaa Muuse awooday inuu biyo ka siiyo reer binu Israa'iil lama-degaanka?
-Maya.

-Maxaa taas sabab u ah?
-Waayo lama-degaanka oodhan biyo lagama helo.



-Miyaa reer binu Israa'iil awood u lahaayeen inay biyo ka helaan lama-degaanka?
-Maya.

-Maxaan biyo looga helaynin lama-degaanka?
-Waayo lama-degaanka ma leh biyo.

-Waa kuma Kan keliya ee awooday inuu reer binu Israa'iil lama degaanka biyo ku siiyo?
-Ilaah.

-Miyaa reer binu Israa'iil rumaysteen in Ilaah biyo ka siinayo lama-degaanka?
-Maya.

-Intii ay rumayn lahaayeen in Ilaah lama-degaanka biyo ka siin karo, maxay reer binu Iraa'iil sameeyeen?

-Waxay bilaabeen inay Muuse iyo Haaruun eedeeyaan.

-Miyaa Ilaah maqlay reer binu Israa'iil oo eedaynaya Muuse iyo Haaruun?
-Haa.

-Miyaa Ilaah raalli ka noqday in reer binu Israa'iil cidlada oon ugu dhintaan?
-Muxuuse Ilaah ku yiri Muuse?

Bal aynu akhrinno Baxniintii 17:5-6a

5-Markaasaa Rabbigu wuxuu Muuse ku yidhi, Bal dadka ka hor mar, oo waxaad kaxaysataa waayeellada reer binu Israa'iil,

ushaadii aad webiga ku dhufatayna gacanta ku qabso oot ag.

6-Oo bal ogow, halkaas ayaan hortaada isku dul taagi doonaa dhgaxa weyn oo Xoreeb yaal, kolkaas waa inaad dhagaxa ushaada ku dhufataa, oo waxaa halkaas ka iman doona biyo ay dadku cabbaan.

-Maxaa Ilaah u sheegay Muuse inuu sameeyo si biyo loo helo?

-Ilaah wuxuu Muuse ku amray inuu dhagaxa usha ku dhufto.

-Haddii Muue haddiico amarka, Ilaah wuxuu reer binu Israa'iil dhagaxa ka siinayaa biyo.

-Yaa keliya e awood u lahaa inuu reer binu Israa'iil biyo ka dhex siiyo dhagaxa?
-Ilaah.

-Miyaa Muuse Ilaah addeecay?

Bal aynu akhrinno Baxniintii 17:6b

6-Kolkaasaa Muuse sidaas ku sameeyey waayeelladii reer binu Israa'iil hortooda.

-Muuse wuxuu addeecay Ilaah.
-Muuse wuxuu ushii ku dhuftay dhagaxa isla sidii Ilaah ku amray.

-Waayo Muuse wuxuu addeecay Ilaah, Ilaahna wuxuu reer binu Israa'iil siiyey biyo.

-Markii aynu haddaba Ilaah addeecno, Ilaah wuu ina badbaadinayaa.



-Markii aynu Ilaah addeeci weyno, Ilaah ina badbaadin maayo.

-Waa inaynu Ilaah u addeecno si waafaqsan jidadkiisa.

-Markaa Ilaah laguma addeeci karo haddii nin waliba dariiqiisa iska qaado, oo uusan ku socon sharciga Rabbiga.

-Waa kuma kan keliya ee inaga badbaadin kara awoodda dembiga?
-Ilaah oo keliya.

-Waa kuma kan keliya ee inaga badbaadin kara awoodda dhimashada?
-Waa Ilaah oo keliya.

-Waa kumakan keliya ee inaga badbaadin kara awoodda Shayddaanka?
-Ilaah oo keliya.

-Miyaa Ilaah reer binu Israa'iil ku badbaadiyey dariiqii ay doorteen?
-Maya.

-Sidee buu Ilaah ku badbaadiyey reer binu Israa'iil?

-Wuxuu ku badbaadiyey markii ay qaateen dariiq waafaqsan kan uu isagu amray.

-Sidee baa Ilaah dadka oo dhan ku badbaadiyaa?

-Wuxuu dadka ku badbaadiyaa marka la raaco dariiqiisa isagu uu dhigay.